



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS Si
waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8aad	Kulanka: 5aad
Taariikhda: Sep 09, 2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda Uu Furmay: 11:30 AM	Saacadda Uu Xirmay: 1:04 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiirka Wasaaradda Cadaalada & Arrimaha Dastuurka Mudane Xasan Macalim Maxamuud oo uu weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda. 2. Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Muadne Cabdiqafaar Xaange oo uu weheliyo Agaasimaha Guuud	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 3 ^{aad} Hinse Sharciyeedka Dib- u-eggista sharciga la-dagaalanka Burcad-Badeedka iyo Ka Hortaga Afdubka 4. Akhrinta 2 ^{aad} Ee Hindise-sharciyeedka wax-kabeddelka qaybta 6aad ee sharciga iibka qaranka. 5. I.W.K

Furitaanka Kulanka:

Senator Saciid cawke ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka Golaha Aqalka Sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday

sidaan: **Oggol: 28 Senator Aamusnaansho: Majirin**

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka Golaha Aqalka Sare Senator Cali Shacbaan Ibraahim ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka Cadaalada Arrimaha Diinta iyo Awqaafta Xuquuqul Insaanka Haweenka iyo Carruurta Senatar Naciima Xasan Xaaji maxamuud (Gadhweyne) si ay Golaha uga horjeediso warbixin ku saabsan akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaalanka Burcad- badeedka iyo ka Hortaga Afdubka. Warbixinta kaddib Guddoomiye ku-xigeenka Golaha Aqalka Sare Senator Cali shacbaan ibraahim ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La- dagaalanka Burcad- badeedka iyo ka Hortaga Afdubka waxay u dhacday sidan:

Oggol: 29 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib Guddoomiye ku-xigeenka Golaha ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Cadaalada & Arrimaha Dastuurka Muade Xasan Macalim Maxamuud Si uu uga mahadceliyo xubnaha senatarada ee ansixiyey sharciga. Guddoomiyaha Golaha Senatar Cabdi Xaashi Cabdullahi, ayaa u yeeray Guddoomiyaha ku-xigeenka Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senatar Ibrahim Awgaab Cusmaan si uu Golaha uga horjeediyo warbixin ku saabsan Akhrinta 2aad Ee Hindise-sharciyeedka wax-kabeddelka qaybta 6aad ee sharciga iibka qaranka. Warbixinta kaddib, 5 Senator ayaa ka dooday akhrinta labaad Hindise-sharciyeedka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La- dagaalanka Burcad- badeedka iyo ka Hortaga Afdubka.
3. Guddoomiyaha Golaha Senatar Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska in ay soodiyariyaan Akhrinta 3aad Ee Hindise-sharciyeedka wax-kabeddelka qaybta 6aad ee sharciga iibka qaranka. Iyaga oo ku soo daraya soojeedimaha Senatarada.

Ugu dambayntii, Shirgudoonka Shirka Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senatar Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **1:04 PM.**

DHAMAAD